جمهورية مصر العربية
وزارة الأوقاف

25جمادى الآخرة1443هـ
28 يناير 2022م

(1)

## Xaqa dalka iyo wax u huriddiisa

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

{وَاعْتَصِمُوا بِحَبْلِ اللَّهِ جَمِيعًا وَلَا تَفَرَّقُوا}،

**(Xarigga Alle qabsada dhammaantiina hana kala tagina)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

Intaas kaddib:

Dalka wuxuu ku leeyahay qalbiga dadkiisa darajo sare, in la sheegtana waa wax qofka ku abuuran oo nafta aadanaha toosan ku abuuran, wuxuu leeyahay Al-asmaci (Ilaahay ha u naxariistee): haddaad rabto inaad ogaato qofka inuu ballanta oofinayo eeg siduu dalkiisa iyo walaalihiisa ugu xiisayo iyo siduu ugu ooynayo wixii ka tagay waqtigiisa.

Jacaylka dalka iyo sheegashadiisa waa waajib diini ah; sidaa awgeed shareecada islaamka waxaa ka buuxa in

laysugu yeero in la xoojiyo sheegashada dalka, iyo in laga shaqeeyo sarreyntiisa iyo hormarintiisa, waa kanaa nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) markuu usoo hijrooday Madiina almunawara wuxuu eegay dalkiisa Makka almukarama asoo sagootinaya, wuxuu yiri: maxaa kaa fiican dal ahaan! oo layga kaa jecel badan yahay haddii aysan dadkayga iga kaa soo saari lahayn ma bixi lahayn, markuu u hijrooday (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) Almadiina almunawara oo uu degay wuxuu Alle (caza wa jalla ) ka baryay inuu jeclaysiiyo wuxuu yiri (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(اللهُمَّ حَبِّبْ إِلَيَنَا المَدِينَةَ ، كَحُبِّنَا مَكَّةَ أَو أشَدَّ)**

**(Ilaahayow Madiina na jeclaysii, sida Makka aannu u jecel nahay)**

Jacaylka dalka ma aha kaliya ereyo lagu hadlo, ama astaamo la muujiyo; waa dhaqan iyo in la huro wax kastoo qaali ah oo qiime badan, wadaninimada dhabta ah waxaa laga wadaa in la sheegto dalka daacadna loo ahaado, iyo in lagu dadaalo amaankiisa iyo xasilloonidiisa, iyo hormarkiisa iyo sarreyntiisa, sidoo kale waxaa laga wadaa in la laasimo dhammaan xuquuqda iyo waajibaadka, wadaninimada dhabta ah waa furasho, iyo in dalka lagu faano; maxaayeelay dalka

wuxuu naga mudan yahay in aan u hurno sharaftiisa iyo sarreyntiisa iyo ilaalintiisa.

Waxaa ugu muhiimsan xuquuqda uu dalku leeyahay in dartii wax loo huro, shaki kama taagna in huridda nafta ay ka mid tahay heerarka ugu sarreeya huritaanka, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{مِنَ الْمُؤْمِنِينَ رِجَالٌ صَدَقُوا مَا عَاهَدُوا اللَّهَ عَلَيْهِ فَمِنْهُم مَّن قَضَى نَحْبَهُ وَمِنْهُم مَّن يَنتَظِرُ وَمَا بَدَّلُوا تَبْدِيلًا}**

**(Mu'miniinta waxaa ka mid ah Rag ka rumeeyay waxay Eebe kula ballantameen, waxaana ka mid ah mid Gutay Ballankii (Ajashiisii) waxaana ka mid ah mid sugi mana ayna badalin)**

Wuxuu ugu bishaareeyay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) dadka ilaalinaya dalka oo naftooda u huraya iyagoo difaacaya inay naarta ka badbaadayaan, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(عَيْنَانِ لَا تَمَسُّهُمَا النَّارُ، عَيْنٌ بَكَتْ مِنْ خَشْيَةِ اللهِ، وَعَيْنٌ بَاتَتْ تَحْرُسُ فِي سَبِيلِ اللهِ)**

(**Labo il naar ma taabato, il cabsida Alle la ooysay, iyo il ku dhafartay iyadoo Alle dartii ilaalo ugu jirto**)

Sidaa awgeed dadka naftooda huraya waxay muteen inay ka mid noqdaan dadka mu'miniinta Ilaahay doortay anbiyadana ay la jiraan iyo siddiiqiinta iyo dadka suuuban, wuxuu leeyahay Alle (SW):

{وَلِيَعْلَمَ اللَّهُ الَّذِينَ آمَنُوا وَيَتَّخِذَ مِنكُمْ شُهَدَاءَ}،

**(iyo in Eebe Muujiyo kuwa rumeeyay kana yeesho Xaggiinna Marag, Eebana ma jecla Daalimiinta)**

Wuxuu leeyahay Allaha sarreeya:

{وَمَن يُطِعِ اللَّهَ وَالرَّسُولَ فَأُولَـئِكَ مَعَ الَّذِينَ أَنْعَمَ اللَّهُ عَلَيْهِم مِّنَ النَّبِيِّينَ وَالصِّدِّيقِينَ وَالشُّهَدَاءِ وَالصَّالِحِينَ وَحَسُنَ أُولَـئِكَ رَفِيقًا}.

**(Qofkii adeeca Alle iyo rasuulka kuwaasu waxay ahaan lajirka kuwuu u nimceeyay Alle, oo nabiyada, rumeeyayaasha, shuhadada iyo kuwa suubban waxaana u fiican rafiiq kuwaas)**

****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan lagu khatimay nebiyada iyo rasuullada, sayidkeenna Muxammad (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), iyo dhammaan ehelkiisa iyo asxaabtiisa.

Waajibka dadka ka saran dalkooda waa inay si kaste u aadaan meesha danta dalka ay ku jirto, hadday tahay inay ku furtaan naftooda iyo dhiiggooda marka arrintaas loo baahdo, inay si wanaagan ula wadaagaan wixii maslaxada dalka ay keenayso waa iimaanka meesha ugu daciifsan marka la eego sheegashada dalka iyo jacaylkiisa iyo in daacad loo noqdo.

Canshuurta dalka hal jiil ma bixiyo, ama qaar ka mid ah dadkiisa, Hase yeeshe, waa geedi socod ka qaybqaadasho iyo wada jir oo ka dhexeeya dhammaan jiilalka kala dambeeyay.

Waxaa ugu muhiimsan xuquuqda dalka: dadaalka iyo shaqada iyo sugidda, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha haatee):

**(إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ إِذَا عَمِلَ أَحَدُكُمْ عَمَلًا أَنْ يُتْقِنَهُ)**

**(Wuxuu jecel yahay Alle midkiina hadduu camalfalo inuu sugo)**

Waxaa ka mid ah in la guto waajibka shaqada, maxaayeelay shaqada guud waa amaano iyo mas'uuliyad, in la guto xaqeeda waa waajib sharci iyo mid wadaniba ah, dayacaadda gudashada waajibaadka shaqo waa mid ka mid ah noocyada ugu daran ee fasahaadka, waxaa lagama maarmaan ah in qofku uu yeesho qalbi nool iyo damiir feejigan, isaga oo mar kasta dareemaya hadalka Allaha sarreeya:

**{وَهُوَ مَعَكُمْ أَيْنَ مَا كُنتُمْ وَاللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ} .**

**(Eebana waa idinla joogaa meelkastood ku sugantihiinba, waxaad camal falaysaanna Eebe waa arkaa)**

Waxaa ka mid ah in calankiisa la tixgaliyo iyo nashiidkiisa, astaamihiisa iyo astaamaha kale ee qaranka, calanku waa astaanta qaranka iyo ciwaanka, oo ay ku

kulmaan dhammaan muwaadiniintiisa dal iyo dibadba, hoostiisa, waxay ku gaadhaan waxqabadkooda iyo guulahooda, ixtiraamkiisana wuxuu ka mid yahay mudnaanta iyo tiirarka dhismaha dawladnimada.

Waxaa ka mid ah: matalaad wanaagsan oo uu ku leeyahay gudaha iyo dibadda iyo dhammaan fagaarayaasha dalka iyo caalamkaba, iyo in lagu dadaalo calankiisa inuu ka babado dhammaan dowladaha iyo dalalka, Iyo in uu qofku ahaado safiirka ugu wanaagsan dalkiisa, meel kasta oo uu joogo.

Waxaa ka mid ah: in aan laga yeelin in dhulkiisa iyo awooddiisa lagu xad-gudbo, ama af iyo adinba lagu wiiqo, oo cadowgiisa laysaga difaaco, hadal, naf iyo waxyaalo qaali ah, mar kasta oo loo baahdo.

**Ilaahayow ilaali dalkeena Masar iyo dhammaan dalalka caalamka**